# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 35aad fadhigii 14aad**

**23/12/2017**

**Ajendaha:-** Dooda Xisaab Xidhka Miisaaniyadii 2016kii.

**Quraanka:-** Md. Maxamuud Axmed Obsiiye

**Gudoonka:-** Gudoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Ogolaanshaha Codsiga Istiqaalada Xildhibaan Saleeban Yuusuf Cali Koore.
- Dooda Xisaab Xidhka Miisaaniyadii 2016kii.

**Gudoomiyaha:-** Waxaynu mudanayaal maanta u balansanayn gudo galka dooda xisaab xidhka 2016, xoghaynta ha qorto magacyada mudanayaasha dooda galaya.

**Gudoomiyaha:-** Waxaan ku soo dhawaynayaa xildhibaan:-

**Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** Guddoomiye horta waxa la yidhaa Miisaaniyadda iyo xisaab xidhada midna siyaasada kamaynu lahayn oo markay seddex sanno inoo timaado ayeynu iska ansixin jirnay, kana wuxuu kaga duwan yahay ma jirto. Waxaan soo jeedinayaa in wixii imika ka dambeeya aynu siyaasad ka yeelano Miisaaniyada iyo Xisaab xidhada kana kuwii hore ayuunbuu la mid yahee aynu iska ansixino oo iska siidayno.

**Gudoomiyaha:-** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay, Waxaan imikana ku soo dhawaynayaa xildhibaan:-

**Md. Maxamuud Jaamac Warfaa:-** halkan waxa ina horyaala xisaab xidhkii 2016 iyo warbixin ay soo qoreen Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka. Markaa laga hadlayo xisaab xidh, inagu waxaynu isticmaalnaa habka la yidhaa double accounts system, waxa uu ka kooban yahay Dakhli iyo Kharash. Miisaaniyaddii 2016 waxa ku cad 1,218,000,000 inuu ahaa odoroska Miisaaniyadda 2016. Warbixinta ay Guddidaasi ina siisay waxay ku sheegtay inay soo xarootay 1,176,500,000 SL.Sh.

Waxay guddidu sheegtay inta aan soo xaroonini ay tahay 41,944,000,000. Halkan waxa kale oo ay cadeeyeen in aanay xisaab xidhkan la socon document-gii looga baahnaa. Sidoo kale wixii baxayaa waxay ku baxaan (payment voucher), halka wixii soo galayana loo isticmaalo (General

recipient). Markaa halkan kuma cadda payment vouch-rada ay lacagtani ku baxday. Kumana cadda RV iyo lambaradii ay soo xaroodaan. Waxa kale oo jira Bank Statement ama daily statement oo sheegaya inta lacag ah eel ala baxay ama soo xarootay, waxaan soo jeedinayaa in loo yeedho Hanti dhawraha Guud si uu warbixin inooga siiyo xisaab xidhkan 2016.

**Gudoomiyaha: -** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay, Waxaan imikana ku soo dhawaynayaa xildhibaan:-

**Md. Xaamud Cisman Cigaal: -** Waxaan taageersanahay oo ku raacsanahay intaan uu yidhi Xildhibaan Maxamuud Jaamac Warfaa oo yidhi ama xildhibaanadii iga horeeyey WCS.

**Md. C/raxman Cismaan Caalin: -** Waxaan leeyahay Guddida waxay soo jeedisay qodob, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen qodobada ay soo jeediyeen labadii xildhibaan ee iga horeeyey. Waxa balankeenu u dambeeyey ahaa xisaab xidhka 2016 in aynu mustawaha uu leeyahay qabadsiin doono. Markaa aniga waxay ila tahay oo aan soo jeedinayaa 7 qodob ee guddidu soo jeedisay, waxaana qoqodbadaas ka mid ah in Hanti dhawraha Guud loo yeedho, in kasta oo ay ku haboonayd in ay iyagu u yeedhaan markii hore oo ay soo dhammaystiraan. Haddiise ay seegtay oo ay inoo soo jeediyeen oo ay inoo soo jeediyeen waxa lagama maarmaan ah in aynu hanti dhawraha Guud u yeedhno oo wax cadaynoo su'aalaha aynu u baahan nahay waydiino is ay inoogu caddaato khaladaadkii hore ee aynu galnay, iyada oo ahayd in xeerka aynu ansixinay la waafajiyo maadaama oo kani ka soo gaadhay, waxaan soo jeedinayaa xeerarkii hore ee aynu ansixinayna ku dhaqano Hanti Dhawraha aynu u yeedh aynu su'aalo u waydiino.

**Gudoomiyaha:-** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay, Waxaan imikana ku soo dhawaynayaa xildhibaan:-

**Md. Wali Axmed Xaawa: -** Waxaan salaamayaa Shir-guddoonka iyo Xildhibaanadaba, waxaan ku raacsanahay xildhibaan intaan la keenin warbixinta in Hanti dhawruhu Golaha yimaado. Haddaad eegto miisaaniyadda 2016. Madaxweynaha wuxuu wareegto ku joojiyey Miisaaniyada kamaynaan hadal, laakiin waxa jiray Madaxyo la fasaxay oo ahaa qalabyada xafiiska, shidaalka iyo mushahaarooyinka isaga oo joojiyey wax allaale wixii kale oo dhan. Markii Madaxweynuhu wareegtadaas soo saaray kamaynaan hadal hadhaagii lacagtuna kuma jirto, waxaan si leeyahay lacagtani abaarihii ayey ku baxday mar haddii aynaan ogayn lacagta baxday iyo siday u baxday waa shimbirayaw heesa, markaa waan raacsanahay in Hanti dhawraha guud loo yeedho, isuu uga warbixiyo xisaab xidhkan 2016.

**Gudoomiyaha:-** Xildhibaanku wuu mahadsan yahay, Waxaan imikana ku soo dhawaynayaa xildhibaan:-

**Md. Maxamed Faarax Qabile:-** Waxaynu raacaynaa qaynuun iyo sharci, markaa qaynuunka iyo sharciga hadalkiisu ee inaga ayaa ka tagnay. Qodobka 55aad farqadiisa 6aad waxay si cad u waajibinaysaa soo bandhigida xisaab xidhka Miisaaniyadda muddo aan ka badnayn 6 bilood.

Halkan wax la inooga keenay xisaab xidhkii 2015 oo ahayd in la keeno 6 bilood ee u horeeyey ee 2016. Tani waxay muujinaysaa in Golahani noday wado halaq mareen ah, waxaana meesha ka baxay isku dheelitirnaantii (check and Balance). Waxaan leeyahay haddii aynu intaa hore sidaas yeelnay yeynaan maantana yeelin, arrintana waxay ka soo horjeedaa 55aad oo waajibaninaysaa in xisaab xidhka kasta l keeno 6 bilood ee sanad kasta u horaysa.

Arrintani waa tilmaamaysaa Hantida umadda, xiligan ay marayso waxay tilmaamaysaa in sharci lagu tuntay (Abuse of law), waxaan leenahay oo aan soo jeedinayaa in la celiyo oo loo soo dhammaystiro  document-tigii ay lahayd xisaab xidhka 2016 oo Hanti dhawraha shaqaynaya ee TV ka hadlaya aynu u yeedhno waxna waydiino.

**Md. Maxamed Cali Xirsi:-** Waad mahadsan tahay Gudoomiye, Xisaab Xidhkan hadaan laba kalmadood ka idhaahdo, Gudoomiye macnaha ugu wayn ee uu leeyahay waxa weeye in aynu horta hubin oo Golahani hubiyo waana Qodob dastuuriya marka Xisaab Xidhka la inoo keeno, hase yeeshe waxaan qabaa inaynaan u gudan siday ahayd, horta ma soo baxda Miisaaniyadu mise ma soo bixin ilayn Miisaaniyada la ina horkeeno sida 2017kii ama Miisaaniyada 2018ka waa mala awaal waxa ugu horeeya ee aynu ka hubinaynaa xisaab xidhka waa ma soo baxay mise ma soo bixin, waa inay ka jawaabta in Miisaaniyadii 300 ee Milyan ahayd ay so baxday, maan arag iyadoo dokumantigani ka jawaabaya arrintaas anigoo u mahadnaqaya Gudidda, hadana waa in marka hore dukumentigani ka jawaaba arrintaas.

Marka Xisaab Xidhka la inoo keeno waxaa la inooga baahan yahay inaynu hubino in Miisaaniyadii mala awaalka ahayd soo baxday, waxaa la inooga baahan yahay in Kharash kasata oo la galay la hubiyo siday u baxeen iyadana. Sida Caadadu ahay ee Hanti-dhowrku la bartay Golahan waa figures halka ku qoran oo ah 2+2 ama 3+4 iyo wax la mid ah, siday u baxday kuma qorna, waana inagu ceeb, Xeerkii hore sidaan ka xasuusnahay wuxuu si cad u qeexayay in Golaha la horkeeno oo la soo raaciyo wax kasta dukumentis siday u baxday ha yaraato ama ha badnaato laakiin xaq baynu u leenahay oo Golahani xaq buu u leeyahay wax kasta siday u baxeen in la cadeeyo oo dukumentiskii ay stationary ku qaadan jireen, mushaharada payrollkii ay ku qaadan jireen oo dukumentiyada caynkaas ah ay la socdaan, halkan waxaan Warbixintan ka arkayaa oo Gudiddu cadaysay in Miisaaniyadii sidaynu doonaynay, in 2%ka sidii loogu talagalin aan loo isticmaalin, waxa kale oo ay cadeeyeen in Madaxyada Miisaaniyada sidaynu ku ansixinay aan loo isticmalin oo tusaale ahaan oo lacagtii guri baa lagu dhisayaa ugu jirtay si kale loo isticmaalo sida in Mushahar laga dhigto taasina waa khalad Gudiddu halkan bay ku cadaysay inay dhacdo.

Mudane Gudoomiye, Waxaan anigu soo jeedinayaa Hanti-dhowraha Qaranku wuxuu Golahan la bartay in Duuduub loogu ansixiyo, Hanti-dhowraha Qaranku wuxuu Golahan la bartay inuu caqligiisa iyo ra'yigiisa iyo raganimadiisa intaas oo nin uu ku ciyaaro sababtoo ah tii hore ee aanu ka qaylinaynay markaan anigu Gudidda Gudoomiyaha u ahaa waxaa ku qornayd 2+2=5, khaladka

waxaa Golahan, shir-gudoonka ayaa khaladkaas lahaa, waa kaas Cali Yuusuf wuu fadhiyaaye (Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada Md. Dr. Cali Yuusuf) markii aan u geeyay ayay inta Baashe iyo Cali Yuusuf inan yar oo Agaasime ah loo yeedhay oo xafiiskaas u soo xidheen oo xataa waxay garan waayeen inay Gudiddii Warbixinta keentay u yeedhaan, xataa waxay garan waayeen bal iyagana (Gudidda) ra'yigooda eega, khaladaadka noocaas ah baa Golaha horyaal, Hanti-dhowre loo yeedho waxba tarimayso, waxaa loo baahan yahay Gudi inta Golaha laga saaro soo baadho sida waxani u baxeen, sida waxani u dhaceen, ta kaliya ee wax lagu sixi karaa waa sidaas ah in Gudi loo saaro ay gudiddaasi ka jawaabto ilayn Miisaaniyadii waynu haynaaye waxaynu doonayno, hadiise aynu Hanti-dhowraha u yeedhno sidaan filayo wuu cusub yahaye.

Markaa anigu waxaan Soo jeedinayaa Gudi baadhitaan ha loo saaro Dukumentigaas iyo wax ina horyaala ha soo baadho, Miisaaniyadii aynu ansixinay waa la joojiyay gabigeediiba waad arkayseen Wasiirkii Ciyaaraha oo ku cabanaya inana lacagba loo sii dayn, wixii kharashaad ahaa waa la joojiyay la inaguma soo celin oo la inama odhan waxaad ansixiseen waxbaa iska badalay, kharashaadkaas la joojiyay oo millions dollar gaadhaya meel alaale meel la geeyay iyo meel accounts u tahay la garan maayo, markaa waa in intaas oo millions dollar kharashaad ah ee la joojiyay la ogaado sababta oo Gudiddaasi soo baadho halka lagu isticmaalay iyo sida loo isticmaalay.

Waxaa Iyana sidoo kale mudan oo baadhitaan u baahan Khasnada Dawlada in iyada laftigeeda oo intaas oo million oo dollar ay ku jirtay la helo siday u baxday, Markaa sida kaliya ee lagu heli karaa, sida kaliya ee Golahani ku ogaan karaa si uu qarankan u soo hor dhigo, sida kaliya ee dawlada cusub ku caawin karnaa, sida kaliya anagu Xisbi ahaan (Xisbiga Kulmiye) aanu habi ku noqon karnaa waa In Gudi Golaha laga magacaabo oo ay soo baadho meel kastna tagno oo lacagahaasi meeshay mareen xog dhab ah ka keenta ayaa loo baahan yahay, waana ka baxay Gudoomiye.

**Gudoomiyaha Axmedyasiin Sh. Cali: -** wuu mahadsan yahay Mudanuhu, Maxamed Cumar Jiir

**Md. Maxamed Cumar Aadam Jiir:-** waxaan doonayaa in laba ama saddex su'aalood inaan idin soo dhex dhigo oo ah Hanti-dhawrka caadiyan waynu ognahay wax loo sameystay laakiin anigu wali maan maqal oo idaacadaha iyo warbaahinta kale kamaan maqal wax laga sheegayo oo hanti-dhawre qabtay, markaa horta ma shaqeeya mise ma shaqeeyo?, hantidhowrku wuxuu ka mid yahay hay'addaha madax banaan inuu ka mid noqdo, waa waxyaabaha aynu doonayno inay waydiino marku ina hor yimaado, waxa kale oo aan idin waydiinayaa waxaan filayaa in dastuurku odhanayo lix bilood inuu haysto hanti-dhawruhu Warbixinta oo dabadeed keeno Golaha, maxaa keena in xiligaas la keeno xisaab xidhadaha, sidoo kale maxaa keena in had iyo jeer uu dib u dhacaan ma aqoontii baanay lahay, ma shaqaalaha Ayaan ku filnayn mise qudhun qadhaadh kale ayaa jira, waxaynu u baahanahay inagu sababta waxaas iyo waxani u dhacayaan inagoo qodobada

dastuurka ka duulayna, hadii inagu dastuurka iska idhno marino inagana barito way inagu dhici kartaa oo exception kama noqon karno, marka waxaan doonayaa inaynu su'aalahaas iswaydiino.

**Marwo. Baar Siciid Faarax:-** Gudoonka, Mudanayaasha iyo Saxaafadaba waxaan idinku salaamayaa ASC, Gudoomiye waynu ognahay hanti-dhawrku malaha awood wuu wax ku qab-qabto oo waa tii maalintii dhowayd ee aynu xeerkiisa ansixinaynay la diidayay in illko loo sameeyo uu wax ku qab-qabto, iminkana kalmado yar yar oo jawaab ah buu ina odhan doonaa.

Markaa anigu sidaa Xildhibaan Maxamed Cali Xirsi sheegay waxaan soo jeedinayaa in Gudi la saaro soo baadha madaama Gudiddii ku shaqada lahaydba soo jeedisay qodobo badan oo cadaynaya sida wax u dhaceen iyo in aanay is waafaqsanayn xisaa xidhkan iyo Miisaaniyadii aynu ansixinay oo buuga ay ka muuqato, markaa Gudi soo baadha oo xafiisyadii tagta oo soo ogaata waxani siday u dhaceen la saaro xaqiiqadana aynu u helno ilaahayn maalinta qiyaamaha inagula xisaabtami doono, waan idin salaamayaa WSC.

**Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable):-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaashu way salaaman yihiin, xaqiiqada markaynu ka hadlayno hadii aynu wax wanaajinayno horta waa dastuurka sababta wax inoogu hagaagi la'ayihiin, aduunyada kale hadii Barlamaanku Magacaabo oo ansixiyo isagu Hant-dhawrka wax buu qaban lahaa, laakiin hadii ninkii wax baadhi lahaa nin kale gacanta ugu jiro waxba ma qaban karo umada wax qiimo ah uguma fadhiyo, markaa anigu waxaan soo jeedin lahaa in qaraar (resolution) la helo Goluhu soo saaro anagu barigii waanu soo jeedinay oo waa nalagu kacay waa la qayliyay oo waxay noqotay masiibo ay dawladii waagaasi ka baqday, waxaan so jeedin lahaa anigu markaa inaynu qaraar (resolution) soo saarno la odhanayo waa in la raacaa si umada xoolohoodaas yari u nabadgasho oo aan nin meel fadhiya ama Wasiir aanu ugu tagri-falin, Markaa waa in systemkaas la badalo oo sida caalamka Goluhu ansixiyo qaraarkaas.

Tan labaad, hadii la doonayo in xisaab xidhku hagaago waa in qodobo la raaco oo xisaab xidhka nimanka aqoonta u leh diyaariyaan aynu ansixinaa taas oo la odhanayo waa inuu shuruudahaas wataa xisaab xidhku sida foojaradii iyo cadaymihii kale oo hadii hay'addahaas ama wasaaradahaasi ku soo xidhaan xisaab xidhkooda sida wax u baxeen iyo foojaradii ay isticmaalene ay la socotaa, hadii shuruudaas laga waayona ay baadil tahay, su'aalna waan idin waydiinayaa hanti-dhawruhu ma aqbalayaa markuu u tago hay'ad inay yidhaahdaan lacagtaasi way baxday oo aanay foojaradii iyo siday u baxday aanay keenin, markaa inagu hadaba aynu sameyno standing order oo odhanaya hadaan sidaa la sameyn qaabkaas ayaa lagaa rabaaye u soo xidh hadii aad u soo xidhiwaydona talaabo ayaa lagaa qaadayaa.

**Gudoomiyaha Axmedyasiin Sh. Cali: -** way mahadsan yihiin Mudanayaashu doodii way inoo dhamaatay, waxaynu nahay hay'ad shari-dejin, waxaad soo jeediseen in Hanti-dhawrihii loo yeedho waana dastuuri, waxaanu dib ka soo sheegaynaa wakhtiga Hanti-dhawraha Guud ina hor iman doono, idinko ku waydiin doona su'aalaha aad jawaab uga baahan tihiin, waana Mahadsan tihiin, fadhigiina sidaas ayuu inoogu xidhan yahay

**Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle**

**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**

---------------------------------------------------- -------------------------------------------